Tusmada Fududaynta

Caddaalada Korontada Gurigayga

Qiimo Intee dhan ayaan Ku bixiyaa Korontayda?

Tusmadaan hagista ah ayaa naga caawinaysa inaan tilmaano qiimeyaasha rasmiga ah ee laga qaadaayo biilasheena korontada iyo meesha/qaabka aan ku badbaadin karno lacagta. Waxaan rajaynaynaa in aqoon kororsigaan uu dhiiri geliyo tashiilida korontada marka aan adeegsanayno (iyo marka aanaan adeegsanayn) qalabka korontada ee guriga. Haddii aad ku nooshahay Twin Cities, la xariir Natalya (narevalo@ceed.org) si aad usoo qaadato Baakada Korontada ee CEED oo aad ka helayso agabka kaydinta korontada si aad lacag uga badbaadsato korontada aadna u tashiilato tamarta. Haddii aad meel fog jirto, waxyaabo badan ayaa laga heli karaa dukaanka agabka dhismaha ee deegaankaaga.

Agabka loo Baahan yahay

- Xaashida Shaqada ee Qalabka Korontada (daabac)
- Timo qalajiyaha
- Mitirka Kill-A-Watt
- Tusaaleyaasha biilka korontada
- Aalada wax lagu xisaabsho
- Xaashi
- Qalin koobiyo

Khayraadka CEED ee lasoo degsan karo lana daabici karo

- Qalabka Kaydka Korontada

Agabka lagu dari karo Baakada Korontada ee CEED

- Qaybo godad badan leh
- Laanbada 60W LED
- Qalabka hawada xira

Tallaabooyinka Fududaynta

A. Horudhac: Yaan nahay? Yaa haalkaan wada jooga? Yoolalka maanta [10 daqiiqo]

B. Isticmaalka Tamarta Guriga [15 daqiiqo]

1. Sii waraaq iyo qalin koobiyo dhammaan ka qaybgaleyaasha. U sheeg inay ku qoraan: Subixii, Galabkii, Fiidkii, iyo Saxda dhexe geesaha kaladuwan ee waraaqdooda.
2. Marka xigta, ku boori inay sawiraan ayna ku qoraan magacyadooda agabka guud ee ay maalinta dhan ku isticmaalaan geesaha waraaqdooda (tusaale inay ku sawiraan kirliga shaaxa qaybya "Subxii" waayo waxaan adeegsadaa kirligayga korontada ku shaqeeya si aan u karsato shaax subixii). U sheeg inay goobin geliyaan agabka ay adeegsadaan marar badan maalinta oo dhan.
3. Sharax in shaqadaan ay ka caawinayso suuraynta meesha tamarta ugu badan loo isticmaalo. Adeegso su'aalo tusmayn ah:
    a. Maxaa loo adeegsadaa caado ahaan ama baashaal ahaan, laakiin laga yaabo inuusan muhiim ahayn?
    b. Maxaa loo adeegsadaa baahi muhiim ah?
4. Si kooban ugu wareeg qolka una sheeg ka qabgaleyaasha inay kula wadaagaan agabka ay inta badan isticmaalaan.

Qiimaha korontada

Waxaan iibsanaa koronto markasta oo aan shidno nalka ama gelino soketka aana adeegsano aalada korontada, laakiin ma naqaano qiimaha lacagta ee ku baxda korontada aan isticmaalno... halka markasta oo aan suuqa aadno, aan naqaano qiimaha rasmiga ah ee kartoonka ukunta ah noogu fadhiyo. Si wadajir ah, waxaan raadin doonaa cadadka qiimaha korontadu noogu kacdo.

C. Fahanka qiimaha qarashka korontada gurigeena [20 daqiiqo]

1. Si aad u fahanto tirada qarashaadka korontada, xisaabta qaar ayaa la adeegsan doonaa. Ku boori ka qaybgaleyaasha inay galaan ciwaankooda shirkada korontada ayna lasoo baxaan diiwaanka kharash hore oo ay baxsheen. Haddii aysan arki karin biilkooda, waxay raadin karaan celceliska qiimaha korontada guriga ee gobalkooda: https://www.eia.gov/opendata/v1/qb.php?category=1012
2. U dhiib waraaqo cusub, oo banaan. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay ku qoraan magacooda godka kor u jeeda , kadib ay ku qoraan “$”, “kWh”, iyo “$/kWh” godadka jiifa. Tixraac shaxda hoose:

	$	kWh	$/kwh
Carlos			

3. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay tixraacaan biilashooda si ay u buuxiyaan godadka banaan. La wadaag oo tixraac faahfaahinta loogu baahan yahay buuxinta shax kasta:
    a. $: Hel qaybta “CADADKA LAGUGU LEEYAHAY” ee ku qoran biilkaaga. Tani waa wadarta guud ee lacagta aad hal bil ku bixsay korontada. Shirkadaha korontada ayaa tiradaan ku jaan gooya qaab ku salaysan cadadka korontada aad isticmaashay, oo ay la socto lacagta canshuurta iyo qarashaadka kale.
    b. kWh: Marka xigta, aqoonso qarashaadka isticmaalka korontada si aad u hesho cadadka KWh ee aad isticmaashay ee ku qoran biilkaaga. Waxaad iibsataa koronto lagu cabiro “kilowatt-saacadii” (kWh). Biilalkooda, waxaa ku qornaan kara qaybaha kaladuwan ee laynka KWh, u sheeg inay isku daraan dhammaan si ay u helaan KWh ay isticmaaleen wadarta guud.
    c. $/kWh: U sheeg ka qaybgaleyaasha inay u qabiyaan "CADADKA LAGU LEEYAHAY" wadarta guud ee KWh ay isticmaaleen. Tirada kama danbaysta ah ayaa ah cadadka aad bixisay halkii kilowatt saacadiiba korontada aad isticmaashay hal bil.

Waa maxay waxa *sida dhabta ah* u kordhinaaya qarashaadkeena?

Tixraac alaabta korontada ee badanaa la isticmaalo ee ka qaybgaleyaashu ku sheegeen billoowga aqoon kororsiga (agabka korontada ee lagu goobeeyay waraaqdooda). Si wadajir ah, waxaan aqoonsan doonaa cadadka qarashka aalad kasta oo koronto nooga baxa.

D. Iibsiga saacadaha kilowatt-ka [40 daqiiqo]

1. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay soo qaataan kursi ayna sameeyaan mareegta koox balaaran.
2. Soo qaado aalada timaha qalajisa iyo mitirka Kill-A-Watt. Qof ba mar u dhiib aalada timaha qalajisa dadka kulanka fadhiya. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay helaan ayna sheegaan "watt-yada" ku qoran aalada timo qalajiyaha.
3. Ku hag ka qaybgaleyaasha sokedka kuugu dhow kadibna geli aalada timo qalajiyaha. Adoo adeegsanaaya mitirka Kill-A-Watt, tijaabi timo qalajiyaha: dhagsii qaybta sitinka: si aad uga dhigto mid sareeya/hooseeya, kulul/qaboow. Ogoow cadadka watt-yada aalada timaha qalajisa ay adeegsanayso ay isbadelayaan marka aad kala badesho batoonnada.
4. Adoo adeegsanaaya lambarada watt-ka ee ka muuqda mitirka, si wadajir ah, xisaabiya qiimaha tamarta ee timo qalajiyuhu isticmaalo sanad kasta:
    a. Aqoonso tirada watt-yada uu adeegsado timo qalajiyuhu.
    b. Ku dhufo saacadaha la isticmaalo maalin kasta. Ogoow lambarka ugu danbeeya.

c. Ku dhufo maalmaha la isticmaalo sanad kasta. Ogoow lambarka ugu danbeeya (lambarka ugu danbeeya ee halkaan ayaa ah wadarta guud ee saacadaha watt ka sanadkii).
d. U qaybi kun (tani waxay saacadaha watt ka u badelaysaa saacadaha KILOwatt). Ogoow lambarka ugu danbeeya.
e. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay dib u tixraacaan tirada saacada killowatt ka ee tijaabadoodii koobaad. kU dhufo lambarka kor ku qoran lacagta $ aad ku bixiso halkii kilowatt saacadiiba. Ogoow lambarka kama danbaysta ah ee kaqaybgale kasta. Lambarka ayaa ah cadadka qarashka mashiinka timo qalajiyaha kaaga baxa sanad kasta.

5. U qaybi ka qaybgaleyaasha 2-3 kooxood. U dhiib Xaashida Shaqada ee qalabka Korontada, oo faahfaahinaysa qiyaasta, iyo xisaabaadka. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay adeegsadaan cabirka si ay u xisaabshaan lacagta ku baxday qalabka korontada ee qolka yaala. Sii ~10 daqiiqo oo kooxuhu ku tijaabshaan kuna xisaabshaan.
6. Soo jeedi qalabka korontada ku shaqeeya marka loo baahdo: talaagada, jaajarka taleefanka gacanta, laabtoobka, laanbada, haawiyaha.
7. Marka waqtigu dhammaado, ku boori kooxaha inay kula wadaagaan qaar kamid ah lambaradooda kama danbaysta ah una oggoloow xubnaha kale inay qiyaasaan nooca qalabka korontada ee ay tijaabiyeen.

E. Dabeecadaha tashiilida korontada [10 daqiiqo]

1. U dhiib liiska Agabka Ku shaqeeya Korontada. Ogoow in agabka korontada ku shaqeeya ee liiska ku qoran ay yihiin kuwa loo arko kuwo cuna watt yo badan oo isticmaala tamarta, xataa marka aan la isticmaalayn.
2. Adoo adeegsanaaya su'aalaha tusmaynta ah, hormuud u noqo muujin kooban adoo tixraacaaya liiska Qalabka Koronta cuna:
    a. Waa kuwee qalabka korontada ee liiska ku jira oo aad wax badan isticmaasho?
    b. Waa kuwee qalabka korontada ee kaa yaabiyay?
    c. Waa kuwee qaar kamid ah qalabka korontada ee gurigaaga oo dansan, laakiin wali ku jira sokedka?

Tashiilida Korontada

Tashiilida Korontada waxaa laga wadaa adeegsiga tamar *yar* si loo qabto isla shaqada - taasoo ah, in meesha laga saaro khasaarinta korontada. Tashiilida Korontada ayaa sidoo kale naga caawinaysa inaan badbaadino lacag aana yarayno qarashka korontada.

Maxaan samayn karnaa si aan u hagaajino qarashaadkeena korontada?

1. Teknoolajiyada la adeegsado: adeegsiga qalabka korontada ee tamarta yar isticmaala
2. Habdhaqanka qofka: mudada aad isticmaasho qalab kasta

F. Muujinada iyo Xirista [10 daqiiqo]

1. Gebagebada; maxay barteen ka qaybgaleyaashu? Maxay la wadaagi doonaan xubnaha bulshada? Maxaan wali laga jawaabin?
2. Oga mahadnaq ka qaybgalayaasha waqtigooda iyo ka qaybgalkooda; waxaan filaynaa inay wax cusub barteen ayna hami u qabaan inay sii wadaan wada sheekaysiga lamid ah kan maanta.
3. U qaybi Baakadaha Korontada.